



Maalinta ugu dambeysa sanad-dugsiyeedka

2019-20 waa Juun 10

Ka dib markii xanuunka aynaan hore u arag kaasi oo dunida oo dhan wada gaadhadh oo sababay in iskuuladii la xiro 13 todobaad ee ugu dambeeyey, sanad-dugsiyeedkii 2019-20 ee Dugsiyada Dadweynaha Portland wuxuu si rasmi ah u dhammaan doonaa maalinta Arbacada ee bisha Juun tahay 10.

Si loo xaqiijiyo in ardaydu hesho casharadoodii inta badan ee suurtagal ah anaka oo isticmaalayna PPS-HD, waxbarashada ku salaysan in guryaha lagu qaato, saddexdii maalmood ee loo suntay in dib loo soo bogo xilligii barafka ee suurtagal ah- Juun 8, 9 iyo 10 waxaa lagu kordhiyey jadwalka waxbarashada iyaga oo ahaa maalmo waxbarasho.

Shantii todobaad ee ugu dambeeyey ee sanad-dugsiyeedka waxa lagu soo koobay afar maalmood, iyada oo shaqaalaha degmada shaqada Jimce kasta ay shaqada ka maqnaayeen. Isbedelka waxaa loo sameeyey tallaabo ah sidii kharashka loo yareyn lahaa sidii ay inooga caawin lahayn inaga oo fileyna in hoos u dhac ballaarani ku dhaco maalgalintii sababtoo ah dakhligii cashuuraha ka soo xeroon jiray gobolka oo hoos u dhacaya taasi oo uu saameeyey xanuunka caalamiga.

Ardaydii fasalka 12naad ee qalin-jabinayey waxaa lagu soo casuumi doonaa sidii ay uga qeybqaadan lahaayeen dabaaldega shahaadada dibloomada oo bilaabneysa maalinta Isniinta ee bisha Juun 8deeda. Wixii macluumaad dheeraad ah waxaan helin doonaa todobaadkani ([fiiri maalmaha dugsiyada sarre](#)).